Bayaanka Daah-furka Su’aasha Covid-19 ee UK

Waxaa la ii magacaabey Gudoomiyaha Su’aal waydiinta dadwaynaha ee Covid-19 UK markey ahayd Diseembar 2021. Raisul-wasaaraha wuxuu dejiyey shuruudaha tixraaca markey ahayd 28 Juun 2022 kadib la tashi dadwayne iyo dawladaha Scotland, Wales iyo Northern Ireland. Maanta Ayaan bayaankan sameynayaa si aan u furo Su’aasha una dejiyo nidaamkeyga hawlgalineed.

Caabuqa Covid-19 dhammaanteena ayuu na saameeyey. Qaar si ka badan kuwa kale. Dadku waxey waayeen dad ey jeclaayeen si saxsana uguma oyn karin Caruurta iyo dadka yaryar waxey lumiyeen fursado waxbarasho. Ganacsigu waa guul-dareystey. Caafimaadka jir iyo maskaxeed waa wiiqmey. Dadku waxey dareemeen go’adoon. Inkastoo noloshu ey ugu dambeyn bilaabmeyso iney si caadi ah kusoo noqoto, caabuqo wali waa nala jiraa oo kuwo badan ayaa wali la dhibaatoonaya. Kuwa sida ugu badan ugu dhibaatoowey ayaa doonaya iney ogaadaan haddey jiraan wax un laga qaban karay si looga hortago ama lagu yareeyo dhibtooda waana sababtaas sababta loo abaabuley Su’aashan.

Markaan garsoore ahaa, waxaa la tacaali jirey xaqiiqooyin iyo caddeymo. Sidaa darteed aan ku bilowno xaqiiqooyinka caabuqa sida aan aalaaba naqaano.

Markey ahayd 31 Desember 2019, Ururka Caafimaadka ee Adduunka waxaa lagu wargeliyey kiisas kala duwan oo hargab ah oo waxa sababay la aqoon oo lagu arkey Magaalada Wuhan, Gobolka Hubei, China. Caabuqa coronavirus oo cusub ayaa xigtey in lagu ogaado muunado laga qaadey bukaan. Infekshanada coronavirus ayaa si aad ah u faafey markey ahaydn 11 Maarso 2020, Ururka Caafimaadka ee Adduunka ayaa ku qeexey Covid-19 musiibo. Labada kiisa ee ugu horeeyey ee UK ee coronavirus waxaa lagu ogaadey York markey ahayd 30 Janaayo 2020. Yurub, markey ahayd Maarso 2020 waxey la kulantey sare-u-kac daran ee xanuun iyo dhimasho ka timaada fayraska. Wadamada sida Taliyaniga, xeerar adadag ee xakameynaya dhaqdhaqaaqa dadka ayaa lasoo rogey.

Markey ahayd 11 Maarso 2020, iyadoo lala xiriirinayo miisaaniyada sannadka, Madaxa Exchequer wuxuu ku dhawaaaqey adduunka dhan £12 billion ee gargaarka degdega ah si UK looga caawiyo saameynta la filayey ee fayraska. Shan beri kadib, Raisul-wasaaraha ayaa ku taliyey in qofwalbo ee UK jooga kasoo shaqeeyo guriga, la joojiyo xiriirka aan muhiimka ahayn ee dadka, laga fogaado baararka iyo maqaayadaha lana siiyo UK wakhti ey uga hawlgasho caabuqa. Markey ahayd 17 Maarso, Madaxa sare ayaa ku dhawaaqey deyn ey kaabeyso dawlada oo dhan £330 billion iyo canshuur dhimis iyo deeq dhan £20 billion ee lasiiyo shirkadaha soo wajahey burbur. Markey ahayd 18 Maarso, dawlada ayaa ku dhawaaqdey xiritaanka iskuulada laga bilaabo dhammaadka todobaadkaas. Markey ahayd 20 Maarso, Madaxa sare ayaa ku dhawaaqey ey dawladu bixin doonto mushaaraadka 80% shaqaalaha halista ugu jirey iney shaqo la’aan ku dhacdo.

Markey ahayd 23 Maarso, Raisul-wasaaraha ayaa ku dhawaaqey xayndaabyo daran ee qofwalba UK degan, waxa markii dambe loogu yeerey bandowgii ugu horeeyey ee heer qaran. Dadka waxaa keliya loo oggolaadey iney guriga uga baxaan iney soo iibsadaan cunto, soo jimicsadaan, xaadiraan baahi caafimaad ama siiyaan daryeel qof nugul, ama ey shaqo aadaan haddii kasoo shaqeynta guriga ey macquul noqon. Heitaanka iyo meeleynta iyo qeybinta agab shakhsi ee ka hortag (PPE) ayaa noqdey baahi qaran.

Billihii raacey waxaa la arkey sare kac dhimasho oo xoogan (iyadoo madaxdu soo tebisey tiro ka badan 180,000 oo dhimasho oo ku lug leh Covid-19 la diiwaangeliyey tan iyo 9 Maarso 2020[1]), ganacsiyada iyo iskuulada ayaa xirmey, soo rogista kasoo shaqeynta iyo wax kasoo barashada guriga kuwa awoodey, waddanka oo soo deynsanaya lacago badan si kaalmo u bixiyo, dhacdooyinka la baajiyo ama dib-loo-dhigo iyo xayndaabyo daran oo lagu soo rogo xaadirista adeegyada tacsiyadaha iyo diimaha. Xayndaabyada lagu soo rogey dhan walba ee nolosha UK waxey ahaayeen kuwo aan la saadaalin xiliga nabada.

Tallaabooyinka bandowga ayaa la fududeeyey qaar kamida xayndaabyaduna dib baa loo soo rogey sannadka oo idil ee kii xigey iyadoo ku jirto labo bandow oo dheeri ah oo lasoo rogey Oktobar 2020 iyo Janaayo 2021. Markey ahayd Desembar 2020,

[1] https://www.ons.gov.uk/peoplepopulationandcommunity/birthsdeathsandmarriages/deaths/bulletins/deathsregisteredweeklyinenglandandwalesprovisional/weekending1july2022 - 13 Luulyo 2022

tallaalkii ugu horeeyey ee Covid-19 ayaa la bixiyey barnaamij tallaal balaaran ah ayaana raacey bilihii iyo sannadadii xigey. Gu'gii 2022, xayndaabyada nolosha qaranka ayaa u bilaabmey in laga fududeeyo dhammaan afarta waddan ee UK ka koobantahay. Dabacan waxaan rajeyneynaa, se ma hubno, in saameynta ugu xumeyd ee caabuqa Covid-19 ey nasoo dhaaftey oo caabuq kalena uusan nagu soo dhaweyn.

Waa si kasoo horjeeda dib-u-daadashadan sababta loo abuurtey Su'aashan.

Waa shaqadeyda iyo waajibaadka Su'aashan in la tixgaliyo lagana soo warbixiyo diyaar-garawga iyo ka falcelinta Caabuqa ee England, Wales, Scotland iyo Northern Ireland. Shuruudaha Tixraaca – oo uu Raisul-wasaaraha dejiyey bishii lasoo dhaafey- ayaa bixiya bayaanka ballaaran ee arrimaha Su'aashu baari doonto. Waa kuwo balaaran, sida ku dabaqmeyso su'aasha dhacdo xajmigan leh.

Tani saas darteed waa shaqo wax ku ool ah, oo haddii ey tahay in si sax ah loo qabto, ey qaadan doonto wakhti iyo qarash. Go'aanka lagu abaabuley Su'aasha anigu ma lahayn, laakiin waxaan leeyahay masuuliyad lagu fuliyo. Waxaa iga go'an inaan u fuliyo Su'aasha sida ugu sare e ugu wax ku oolsan ee macquulka ah, anigoo maanka ku haya shuruudaha tixraaca balaaran ee Su'aasha iyo baahida ah in Su'aashu ey noqoto mid adag oo xalaal ah. Baaxad sidaa u weyn owgeed waxaa laiga rabaa inaan ahaado bilaa damqasho ah. Macquul ma noqoneyso in loo yeero markhaati walba ee dhacdo walbo la xiriira, arrin ama go'aan weyn, saas darteed su'aashu waa iney diirada saartaa arrimaha muhiimka ah.

Hal ujeedo ee su'aashan ayaa ah iney ka bixiso sheeko saxsan waxa ka dhacey guud ahaan UK oo idil. Mida kale waa in la bartaa casharo wargelinaya diyaargarowyo ee caabuqo mustaqbalka ah ee UK. Waxaa iga go'an inaan meelmariyo oo soo gebagebeeyo shaqada Su'aashan sida ugu dhaqsiga badan si loo barto casharada kahor inta caabuq kale dilaacin.

Tani waa Su'aal qaran, lagu dejiyey xeerka Su'aalaha 2005. Tani waxey micnaheedu tahay waa iney ka dhacdaa dadweynaha, ku aadan xayndaab walbo la soo rogey si looga hortago khatarta dhibaato ama dhaawac dan dadweyne. Waxaa u fulin doonaa Su'aasha si dhexdhexaad iyo furnaansho leh sida uu qabo waajibaadka qaranka in la sameeyo. Waxaan xaqiijin doonaa kuwa sida dhow ugu lug leh shaqadeeda iyo bulsho weynta oo idil iney heli doonaan waxyaabaha ugu dambeeya ee saamaqaadkeeda.

Waxaan leeyahay awooda ah inaan caddeyn ka helo dhammaan afarta waddan ee UK qabtana soo saarista dukumintiyo iyo muuqashada markhaatiyaal. Si iskumid ah ayaa ula dhaqmi doonaa dhammaan kuwa caddeyn haya iyo markhaatiyaasha, sida laiga baahanyahay, laakiin si sidaa la siman kama shakin doono inaan cadeeyo aragtideyda ku aadan qof ama urur hor istaaga wadada qabashada shaqada Su'aasha.

Waa muhiim sidookale in aan caddeeyo awoodaha aanan lahayn. Doorkeyga waa inaan raadiyaa xaqiiqda, garowsadaa wixii qaldamey (iyo wixii saxmey), sameeyana

tallooyin oo ah waxa ey tahay iney UK ka barato caabuqa. Ma lihi awooda ah inaan dacwad oogo ama dacwad ka keeno qof, iskaba daa inaan xukmiyo ama xabsi-dhigo sababa la xiriirta ficiladooda ama ka saaristooda si ku saabsan caabuqa.

Waxaan haddeertan jeclaan lahaa inaan u jeedsado ilaha kale ee xog oo muhiim u noqon doona Su'aashan; dhegeysiga dadka wax ku saabsan waxey soo mareen, isticmaalka daraasad iyo kala hadlida khubarada iney soo ururiyaan xogta ugu baahsan ee ugu macquulsan.

Shuruucda Tixraaca waxey u baahantahay in Su'aal waydiiyuhu dhegeysato eyna si taxadir leh u qadariso khibradaha qoysaska laga dhintey iyo kuwa kale oo dhibta soo marey ama dad ka dhintay sababa la xiriira caabuqa Tani waa shaqo culeys leh oo muhiim ah. Su'aashu waxey midan u samayn doontaa dhowr nooc, ey ku jirto 'hawl dhegeysiga' taas oo bilaaban doonta dhammaadka sannadkan.

Hawshan dhegeysiga waxey Su'aasha u noqon doontaa mid qiimo weyn u leh iyadoo soo ururineysa khibradaha caabuqa dhammaan UK, ey kujirto kuwa sida ugu daran u saamoowey iyo kuwa aan codkooda marwalbo la maqlin. Waxey dadku siisaa fursad ey Su'aasha ugu sheegaan waxey soo mareen iyadoon si rasmi ah caddeymo u bixineynin ama xaadireynin dhegeysi dadweyne, si qof walbo u dareemo inuu ka qeybqaadan karo Su'aasha, haddey rabaan, lana maqlo. Kooxdeyda waxey bilawdey sida ey midani uga dhigi lahaayeen sida ugu fudud, tusaale qaab onleen aha iyo

sidookale wadahadal dhammaan UK ah.

Khibradaha lala wadaago su'aasha waxaa la falanqeyn doonaa warbixinadana waa lasoo saari doonaa oo dulmaraya mawduucyada soo baxa. Majiro doonto wax xayndaab ah oo ku aadan waxey dadku u sheegayaan Su'aasha, maadaama aan la baari Karin dhacdadooda shakhsiyeed. Qaabkan waxaan si weyn wax uga baran doonaa saameynta caabuqa ku yeeshey kuwa laga dhintey, daryeel bixiyeyaasha iyo shaqaalaha caafimaadka, ganacsiyadaha, shaqaalaha, daryeel bixiyeyaasha, nolosha, nidaamka cadaalada dambiga, caruurta, guusha tacalinta iyo bulshooyin fara badan ee afarta wadan oo dhan.

Su'aasha waxey sidookale dib-u-eegi doontaa cilmi-baarista jirta ee ku aadan UK ee laga soo xigto adduunka halka ey kaga caawineyso UK iney fahanto diyaargarow iyo jawaab-celin ku aadan caabuqa eyna ugu meeleyso cilmi-baaristeeda meelaha looga baahanyahay falanqeyno cusub. Cilmi-baaris ey Su'aashu qadariso waa lagu daahfuri doonaa dacwadeeda halka ey ku habboontahay waxaana lagu daabici doonaa websaydhka Su'aasha.

Waxey magacaabi doontaa kooxo saynisyahno ah iyo khubaro kale iney Su'aasha ka caawiyaan shaqadeeda, iyadoo dabooleysa mawduucyo iyo aragtiyo kala duwan. Waxey tani umuhiim noqon doontaa iney xaqiijiso in Su'aasha ugu faaiideysato takhasuska yaala eyna fahanto afkaara weyn ee ku aadan qeybaha sayniska iyo dhaqaalaha caabuqa. Su'aashan waa hawl madax-banaan ee xaqiiq raadineed. Ma

samayn doonto mala’awaal, se waxaa xagi doona caddeyn. Kooxaha kubarada ah waxaa loo dhiibi doonaa shaqada ah abuurista warbixino wadajir ah, kuwaas oo loo isticmaali karo caddeyn, qeexayana halkey isku waafaqeen iyo halkeynan isku waafaqin oo ku saabsan mawduucyada loo igmadey iney dad ka caawiyaan. Waa shaqadeyda ka hogaamiye ahaan inaan go’aamiyo xajimga loo dhiibayo.

Kooxaha hogaaminaya shaqadeena baaritaan waxey aalaaba farta ku fiiqeen dhowr mawduucyo oo aan u qoondeyn doono cilmi-baaris una raadin doono latalin khubaro. Waxaan inta Su’aasha socota bixin doonaa qaabkayaga cilmi-baariseed iyo talada khubarada. Waxaan u aruurin doonaa khibradahan, warbixinadan, xogta iyo cilmi-baarista si aan u wargelino shaqada baaritaan ee Su’aasha una diyaarino dhegeysi dadweyne.

Sida awalba la sheegey, Shuruudaha Tixraaca waa kuwo baaxad-weyn oo dalab badan. Afkaar cabbir leh Ayaan siiney sida aan ku soo aruurin karno kuna indho-indeyn karno caddeynta iyo Su’aasha ugu dambeyn u gaari karto gebagabo xoog leh si xalaal ah.

Si wax looga qabto dhinacyada kala duwan ee badan ee caabuqa oo looga Hadley Shuruucda Tixraaca, waxaan go’aamiyey inaan u kooxeeyo qeybo. Waxaan yeelan doona kooxo, jooga UK oo idil, si ay mid walbo u baaraan. Waxey heli doonaan eyna falanqeyn doonaan caddeynta, iyagoo xaqiijinaya in ka qeygaliyaasha muhiimka ah ee su’aasha la siiyo dukumintiyo eyna awood ugu yeeshaan iney u diyaariyaan

dhageysi dadweyne. Si ballaaran ayey si barbar-dhac ah u shaqeyn doonaan. Waxaan dabadeed qaban doonaa dhegeysi dadweyne qeyb walbo ku aadan, midba midka ku xiga.

Raisul-wasaaraha wuxuu sheegey inuu rajeynayo inuu magacaabo labo xubin ee dheeri ku ah guddiga si ey iga caawiyaan dhegeysiga caddeyn iyo samaynta natiijooyin iyo tallooyin. Hase yeeshee, ma rabi inaan kahor dhaco shaqada inta aan la magacaabin, saas darteed waxaan ku amrey kooxda Su'aasha iney hore ugu sii socdaan diyaarinta qeybaha.

Qeybaha waa la magacaabi doonaa si isku xigta ayaana loo furi doonaa, kuwa rajeynaya iney qaataan door rasmi ah ee Su'aashana waxaa lagu casuumi iney codsadaan iney noqdaan ka qeybgale muhiim ah ee qeyb qalbo, si ka duwan Su'aasha intay socoto oo dhan. Inta aan qabanqaabinayo in shakhsiyaadka qaar, kooxaha iyo ururada Ayaan codsan karaya qeybna ka noqon kara ka qeybgale muhiim ah wax ka badan hal qeyb, u qeybinta shaqada Su'aasha iyo u nakhshadeynta qaabkan waxey ii oggolaan doontaa inaan xaqiijiyo in qeyb walbo noqdo qaab la maareyn karo ee ugu macquulsan loona qabto sida ugu wax ku oolsan ee macquulka ah. Waxaan ku casuumayaa in ka qeybgalyaasha ey koox la samaystaan kuwa ey isku aragtida yihiin, marwalbo ey macquul tahay, si loo kaabo maareynta tirada badan ee dad ee la filayo iyo ururada raadinaya darajada ka qeybgale muhiim ah.

Waxey furi doontaa saddexda qeyb ee ugu horeeya waxeyna qaban doontaa dhegeysi hordhac ah ee sannadkan, iyadoo dhegeysiga dadweynaha ee wax ku oolka ah bilaaban doono gu'a 2023.

Qeybta 1 ayaa maanta bilaaban doonta. Waxey qadarin doontaa xadka habboon ee loo aqoonsadey khatarta caabuqa Coronavirus loona qorsheeyey iyo iney Uk u diyaarsaneyd waxa lagama maarmaanka ah. Qeybt waxey eegi doontaa diyaargarowga UK ee ku aadan gebi-ahaanba nidaamka degdega ah ee rayidka, ey ku jirto ileyn, nidaamka maareynta khatarta iyo u diyaarsanaanta caabuq. Waxey indha-indheyn doontaa go'aan-gaarista dawlada ee la xiriira qorsheyn waxey raadin doontaa garowsashada casharo laga soo qaato dhacdooyin iyo tijaabooyin hore iyo barbardhigo caalami ah.

Waxaan qorsheynaya inaan qabto dhegeysiga hordhaca ah ee ugu horeeya qeybtan Sebtembar dhegeysiga dadweyne ee Qeybta 1 waxey bilaaban doontaa Gu'a sannadka soo socda. Sidookale maanta waxaa bilaabmaya habka codsasahda kuwa rajeynaya in loo qadariyo ka qeybgalyaasha muhiimka ah ee Qeybta 1. Taariikhda kama dambeyska codsashada waxey noqon doontaa 16 Ogosto.

Qeybta 2 waxa loo qeybin doonaa laba qeybood. Qeybta kowaad waxey eegi doontaa maareynta siyaasadeed iyo maamuleed iyo go'aan gaaris ku aadan UK. Waxey dabooli doontaa jawaab-celinta UK ee caabuqa Covid-19 waxeyna wax ka qaban doontaa go'aan samaynta dawlada dhexe, ey ku jirto wax ka qabadka adeega

siyaasad iyo rayidba iyo wax ku oolnimada xiriirada dawladaha Scotland, Wales, Northern Ireland, qeybaha maamulka maxaliga ah iyo bulshada isxilqaamey. Waxey eegi doontaa go'aan-samaynta fara-gashiga waaxaha caafimaadka ahayn (sikale haddii loo dhigo bandowyada iyo dhammaan shuruudaha kale ee hayndaabyada), sidookale isticmaalka khibrada sayniska, xog uruurin iyo naqshadeyn, waxgudbin dawlada iyo caafimaad bulsho, ey ku jirto culuumta dhaqanka, fariimeyn iyo joogteynta kalsoonida iyo la socoshada Baarlamaanka iyo sharciga xakameynta.

Iyadoo la qadariyey sawirka UK dacalkeeda (iyo sidookale English) marka loo eego Qeybta 2, Qeybaha 2A, 2B, iyo 2C waxey wax ka qaban doonaan isla arrimaha istaraatiijiga ee saameynta leh aragtida ah Scotland, Wales, iyo Northern Ireland. Qeybaha 2A, 2B iyo 2C waxey ka kala dhici doonaan Scotland, Wales, iyo Northern Ireland siday iskugu xigaan.

Inkastoo Su'aal laga abaabuley Scotland oo hoos imaaneysa Marwo Poole si loo eego arrimaha loo qeybiyey dawladeeda (waxeyna sii ahaan doontaa mid macquul ah in Su'aalaha lagu abaabuli doono Wales iyo Northern Ireland), waajibaadka Su'aasheyga waa UK-oo idil. Iyadoo loo eegayo Shuruucda Su'aalaha 2005 iyo Shuruucdeyda Tixraaca waa lagama maarmaan inaan qadariyo arrimaha oo la ilaaliyey oona qeybsamey labaduba halkey ka jiraan. Hase yeeshee, markey Su'aasha kusoo noqoto qaran walboo baahey ee qeyb dambe si wax looga qabto arrimahaas lagu daboolin Qeybaha 2A, 2B iyo 2C, waa niyadeyda, si la xiriirta arrimaha Scottish, inaan arrimo baahey sida ugu badan ee ugu macquulsan ugu tago Su'aasha Scottish.

Qaadashada habkan, tixgelinteyda aasaasiga ah waa inaan u cadeeyaa dadka UK oo idil degan Su'aashee ka masuul ah arrin gaar ah. Waa inaan sidookale qadarin siiyaa ururada iyo shakhsiyaadka loogu yeeri doono iney caddeyn bixiyaan, siiyaana kalsooni ah in wiicitaanada lagu soo celcelin doonin isla hal shey ee Su'aalo kala duwan. Markey Su'aasheyda baareyso arrimo si gaar ah ula xiriira Scotland, Wales, iyo Northern Ireland, waxaan qadarin doonaa yareynta labalaabida baaritaan, xog ururin, iyo ka warbixinta wax su'aal ah oo ey abaabuleen dawladaha wadamadaas.

Aasaaska Su'aasha ee dhegeysiga dadweynaha waxaa lagu qaban doonaa London, laakiin waxey sidookale wakhti gelin doontaa dhegeysiga caddeyn ku saabsan jawaab iyo saameynta caabuqa midwalbo kamida afartaa waddan ee UK ka koobantahay.

Su'aasha waxey furi doontaa Qeybta 2 dabyaaqada Ogosta sannadkan, qaban doontaa dhegeysiga hordhaca ah deyrta, dhegeysiga dadweynaha ee qeybtana waxey bilaaban doontaa Xagaaga 2023 ee London. Qeybaha 2A, 2B iyo 2C, ayaa intaa kadib raaci doona.

Qeybta 3 waxey baari doonaa saameynta Covid, iyo jawaab celinteeda dawladeed iyo bulsheed, ku aadan si guud nidaamyada daryeelka-caafimaadka iyo bukaanada, isbitaalada iyo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka. Arrimaha kale, waxey baari doontaa nidaamyada daryeelka caafimaad iyo maamul, isbitaalada, daryeelka

aasaasiga ah (ey ku jirto GPs iyo dentistiyaal), saameynta dib-u-dhaca NHS iyo daaweynta Covid ahayn, saameynta bixinta daryeel caafimaad ee barnaamijyada tallaalka iyo aqoonsiga Covid-ka dheeraadey iyo gargaar.

Kuwaani waa qeybaha kowaad ee qura oo ey Su'aashu baari doonto su'aashuna waxey daabici doontaa xog dheeri ah ee ku aadan qeybaha dambe bilaha soo socda. Si aad u baahsan, waxey kuwaan u badantahay iney daboolaan arrimaha 'nidaam' iyo 'saameyn' ee UK oo idil, ey kujirto: tallaalo, daaweyn iyo kahortag fayras UK oo idil, waaxda daryeelka, waxqabadka dawlada iyo PPE, tijaabo iyo raadraac, ganacsiyada Dawlada iyo jawaabaha maaliyadeed UK oo idil iyo saameynta waaxaha ganacsiga, sinnaan la'aanta caafimaadka iyo saameynta Covid-19, waxbarashada iyo caruurta iyo dadka yaryar iyo saameynta Covid-19 ee adeegyada bulshada iyo waaxaha kale ee dadweynaha.

Waxaan ku celinayaa ballanteyda kujirta Shuruucda Tixraaca ee ah marka la baarayo dhammaan arrimahan, sinnaan la'aanta waxey noqon doontaa jilibka hore ee baaritaanada Su'aasha.

Waan ogahay in dad badan ey isweydin doonaan ilaa inta ey sugi doonaan iney maqlaan gebagebadeyda iyo tallooyinkeyga. Ku maamulida Su'aasha qaab qeybo ah, waxaan awoodi doonaa inaan soo saaro warbixino joogto ah. Waxaan ku talo jiraa inaan xaqiijiyo in warbixinada ey diirada saaraan falanqeynta muhiimka ah, natiijooyinka iyo tallooyinka laguna qorey luuqad fudud si qof walbo oo rabo inuu

akhristo si fudud ugu fahmo. Halka aan tallooyinka u sameeyo dadka iyo ururada, waxaan rajeynayaa in la qadariyo oo si degdeg ah looga soo jawaabo, si loo xaqiijiyo in UK ey xadba intey awoodo si wacan ugu diyaarsantahay ka jawaabida caabuqa iyo difaacida nolosha dadkeeda. Su'aasha waxey kormeeri doontaa dhaqan-gelinta tallooyinka ey sameyso intey socoto.

Waxaan rabaa inaan ku dhameeyo halka aan ka bilaabey taas oo ah samaynta muhiimada su'aashan ey u leedahay kuwa sida ugu badan u dhibtoodey. Inta lagu jirey wada-tashiga dadweyne ee sannadkan, marka aan la kulmey qoysaska waayey kuwa ey jeclaayeen inta lagu jirey mudada caabuqa, waxaa l dhaawacey nooca naxdinta leh ee waayida, isii xumeeyey saameynta hayndaabyada la meel mariyey xiliga ey tacsi dhigan lahaayeen. Waxaan ogahay in kuwa kale sidookale ey ka cawdeen dhib xoog leh ee uu sababay caabuqa oo qof walbana ey noloshooda xad hoogaho ah isku bedeshey. Qeybteyda, waxaan samayn doonaa inta karaankeyga ah si aan u meel mariyo Su'aasha qaab aan u garowsanayo dhibtan raadinayana yaraynta dhibta dadka kale ee isla qaabka ah mustaqablka.

Marka loo eego ballaca baaritaankeyga, tani sida degdega ah ee dadka qaar u maleeyaan looma dhamestiri doono. Taasi wax raali galin ah kama bixinayo. Waxaa iga go'an inaan xaqiijiyo in Su'aasha ey marin u hesho caddeynta ey u baahantahay heshana wakhtiga ey ku falanqeyso caddentaas si sax ah kahor inta markhaatiyaasha eysan horteyda kasoo muuqan. Waxaan xaqiijin doonaa in isku-aadka qeybaha ey macquul noqdaan dhisaana sawir caabuqa ah; qofwalbo kuma raaci doono

isku-aadkaas se waxey ii oggolaan doontaa inaan si qoto-dheer oo wax ku ool ah u eego xaalad walbo ee aan aaminsanahay iney indha-indheyn u baahantahay.

Su’aashan waa fursadeena aan ku xusno wixii dhacey oo dhan inta uu caabuqa ka socdey UK – wixii la hagaajin karo iyo wixii si wacan loo qabtey labaduba – sifo aan si fiican ugu qalabeysanaano si aan ula tacaalno caabuqyada mustaqlka.

Sidookale waa fursad lagu bixiyo diiwaan waara ee saameynta daran ee caabuqa dadka ku nool UK oo idil.

Ugu dambeyn, kooxda Su’aasha iyo aniga waxaan isku dayi doonaa inaan raadino qaab aan ku xusno kuwii naga tagey sida ugu xushmada badan ee ugu habboon.